

SOMALI - Soomaali

Sida codka looga bixinayo Doorashada Guud ee Dawlad Goboleedka Western Australia

Fadlan weydii Sarkaalka Doorashada

- Haddii aad u baahan tahay caawimo
- Haddii aad qalad samayso
- Haddii aadan fahmi karin awaamiirtaan aadna u baahan tahay mutarjumka adeega afcelinta (haddii telefoon la hello karo).

Codbixinta doorashada degmadaada

Ka hor inta aadan hellin warqadaha codbixinta, Sarkaalka Doorashada ee fadhiya miiska ayaa ku weydiin doona saddex su'aallood:

1. Horay codka ma u bixisay maantase weli ma codaysay?
2. Waa maxay magacaaga oo buuxaa?
3. Xaggee ku nooshahay?

Waxaad siin kartaa Sarkaalka codbixinta kaarkaaga sahal ku codaynta (EasyVote card), kaas magacaagu ku qoran yahay dushiisa oo boostada lagu soo dhigay. Haddii aadan haysan kaarkaaga EasyVote card, waxaad ku qori kartaa magacaaga iyo cinwaanka xaashi yar dabadeedna sii Sarkaalka Codbixinta.

Haddii magacaagu ka muuqan waayo Liiska Doorashada

Xaalladaha qaarkood, waxaa laga yaabaa inaad codka bixiso, waxaase lagaa rabaa inaad buuxiso foomka caddaynta. Waxaa ku caawin doona Sarkaalka Codbixinta.

Ka bixinta meel ka baxsan degmadaada doorashada

Haddii aad codka ka bixinayso goob codbixineed oo aan ahayn meesha aad codka ka bixiso, waxaad awoodaa inaad bixiso doorashada maqan (absent vote).

Waxaa kuu hagi doona Sarkaalka Doorashada ee miis kale, kaas oo ku weydiisan doona inaad buuxiso foomka maqnaanshaha ka hor inta aan lagu siin xaashiyaha codbixinta. Ka dib markaad buuxiso xaashiyaha, sida amarku yahay, ku soo celi xaashiyah codbixinta Sarkaalka Ku-dhawaaqista.

Haddii aad qalad samayso

Haddii aad samayso qalad, waxba ha ka welwelin – ku soo celi keliya xaashida codaynta Sarkaalka Doorashada weydiisana xaashi kale – ka dibna bilaw mar labaad. Haddii aad u baahan tahay caawimada codbixinta, weydiiso Sarkaalka Codbixinta.

Habkayaga Codbixintu waa Qarsoodi – Ma jiro qof kale oo ogaanaya ilaa aad doorato inaad u sheegto.


Sida codka looga bixiyo aqalka hoose Golaha ee sharci dejinta

Xaashiyaha cad ee codbixinta – nambar ku qor sanduukh walba.

Si aad adigu u rabto, ku qor nambar sanduukh walba.

Ka bilaw nambar 1aad oo ah musharaxa aad codkaaga siinayso, oo uu ku xigo nambarka 2aad oo aad rabto iyo wixii ku xiga.

Sii wad ilaa aad buuxiso nambarada oo dhan.



Sida codka looga bixiyo aqalka Golaha sharci dejinta


Xaashiyaha guduudka khafiifka ah – laba dariiqo ayaa loo codbixinayaa.

Xaashida guduudka khafiifka ah, waxaad kala dooran kartaa – inaad ka calaamadayso xaashida codbixinta dhinaca bidixda ah ama dhinaca midigta ah – laakiin labadaba maaha.

Dhinaca bidixda ah – ku qor nambarka 1aad, sanduukha dhinaca bidixda ah ee xisbiga, kooxda ama musharaxaad rabto.

AMA

Dhinaca midigta – nambara ku qor dhamaan sanduukhyada sidaad u rabto laga bilaabo nambarka 1aad ilaa sanduukh walba oo midigta ah la buuxiyo. Nambarada ha ku celin.



Ha isticmaalin xariiq, goobaabin, ama ha ka tegin sanduukh eber ah, haddii kale codkaaga la tirin mayo. Haddii aad caawimo u baahan tahay si aad u buuxiso xaashida codbixinta, weydii Sarkaalka Codbixinta.